



Xaashida Xaqiiqda - Dib u-Eegista Qiimaynta Qalinjabinta ee gobolka New York State ! Golaha Maamulka Tacliinta Gobolka New York (New York State Board of Regents) ! Shirarka Gobollo Waynaha Xilliga Qaboobaha 2020 !

Markay ahayd Juliaay 2019, ayay Guddoomiye Betty A. Rosa iyo Golaha Maamulka Tacliinta ayay ku dhawaaqeen inay abuuri doonaan Guddiga Tayada Sarreysa (Blue Ribbon Commission) si loogu fiirsado qiimaynta ka qalinjabinta dugsiga sare ee Gobolka oo dib loo xaqiijiyo micnaha ay leedahay wuxuu ka dhigan yahay helitaanka dibloomada ee Gobolka New York.

Guddigu wuxuu baari doonaa waxay tahay dibloomada Gobolku inay muujiso si loo hubiyo heerka ugu sarreeya ee waxbarashada iyo sinnaanta loogu talagalay arday kasta oo wax ka dhigta Gobolka New York. Guddigu waxay tixgelin doonaan in lagu daro qiimaynno kale oo ah barashada iyo guulaysigu si ka sii fiican uu ugu adeegi doono ardayda kaladuwan ee New York inay u noqdaan tusmo waxay yaqaaniin iyo haddii ay mihnad iyo tacliin sare ahaan diyaar yihiin.

Shirarka Gobol Waynaha ayaa gacan ka geysta Ka Warbixinta Guddiga Tayada Sarreysa

Si looga caawiyo u wargalinta in hawlaha Guddiga Tayada Sarreysa, Golaha Maamulka Tacliinta iyo Waaxda Waxbarashada Gobolku waxay soo uruurinayaan fikradaha kuwa badan oo ay iskaashadaan, oo ay ka mid yihiin waalidiinta, barayaasha, maamulayaasha, shaqaalaha taageerada dugsiga, wakiillada tacliinta sare, bulshada meheradda, iyo guud ahaan. dadwaynaha. Si loo soo ururiyo ra'yi-celintaas, shirar gobol wayne ayaa lagu qabtaa gobolka oo dhan illaa Abriil 2020.

Shir kasta oo gobol wayne, kaqeybgalayaasha shirka ayaa yeelan doona fursad ay kooxo yaryar ugu kala qaybsamaan sidii ay uga wada hadli lahaayeen oo ay ra'yi-celin uga siin lahaayeen Waaxda shan shan su'aalood oo hagitaan leh:

1. ! Maxaan rabnaa inay ardaydu ogaadaan oo ay karti u yeeshaan inay sameeyaan kahor intayna qalinjabin?
2. ! Sideen ardayda uga rabnaa inay u muujiyaan aqoontaas iyo xirfadahaas oo kale?
3. ! Sideed u qiimayn waxbarashada iyo guulaysiga (markay khuseyso jawaabaha ku aaddan # 2 ee korka) si aad u hubiso inay yihiin tilmaamayaasha dhammaystirka dugsiga sare?
4. ! Sidee ayay qiimaynta guulaysigu sida saxda ah ay uga tarjumayaan xirfadaha iyo aqoonta dadkeena gaarka ah, sida ardayda naafanimada qaba iyo bartayaasha luqadda Ingiriisiga?
5. ! Waa maxay shuruudaha koorsada ama imtixaannada hubin doona in ardayda loo diyaariyo tacliinta sare iyo shaqooyinka ama ka qeybgalka arrimaha bulshada?

Guddoomiyaha Golaha Maamulka Tacliinta ee Betty A. Rosa: “Markaan bilaabeynno habsocodka dib-u-eegista sida ay tahay inuu u ekaado dibloomadu gudaha gobolka New York State, aad ayay muhiim u tahay in aan soo uruurinno fikradaha ka imanaya inta ugu badan ee ah danlayda iyo dhinacyada xiiseynayaba inta suurtagal ah oo la baaro waxa ka hirgalaya gobollada kale. Waxaan rajeynayaa inaan helo oo aan tixgaliyo fikirkooda waxtarka leh inta lagu jiro oo dhan wadahaadalkan muhiimka iyo lama huraanka ah. Dadaalladaas iyaga oo loo maro, waxaan gacan ka geysan doonnaa sidii loo hubin lahaa cunug kasta oo ku nool gobolka New York inuu marin u helo xuquuq loo siman yahay oo lagu helo waxbarasho tayo sare leh. ”



Office of the Board of Regents
89 Washington Avenue, Room 110
Albany, NY 12234
Tel. (518) 474-5889
Faakis (518) 486-2405
limaylka: RegentsOffice@nysed.gov



**New York State
EDUCATION DEPARTMENT**
Knowledge > Skill > Opportunity

Waqti-raaca Qabyo-qoraalka loogu talagalay Dib u Eegga Qiimaynaha Qalinjabinta Gobolka NYS

Wajiga I: Xog Ururin & Waxbarasho	• Noofambar 2019 illaa Abril 2020: □ U fiirsiga qoraallada cilmibaarista iyo waxqabadyada ka jira gobollada kale. Guddiga ugu Warbixi Gu'a (Spring) 2020 □ Koox-hawleedka deegaan waxay kullamada ay qaban doonaan inta lagu jiro bisha Janaayo si ay u soo ururiyaan jawaab-gelinta laga helo gobolka oo dhan. • Xaggaaga 2020: In la aasaaso Guddi Tayo Tacliimeed (Blue Ribbon Commission) (BRC) iyo in la qoro jadwalka kulanka. • Xaggaaga (summer) 2020: Ururi Jawaab-celinta Shirka Deegaanka
Wajiga II: Guddi Tayo Tacliimeed	• Seteember 2020: (Kulanka koowaad ee Guddiga – BRC ayaa shiraya oo caddaynaha xadka howshiisa. • Oktoobar 2020: Shirka labaad ee Guddi Tayo Tacliimeed si loo garto aagagga mudnaanta la siinayo iyo qaab loogu talagalo horay u socodsiinta. In la aasaaso kooxo-hoosaad loogu talagalay aagagga mudnaanta. • Nofeembar 2020 – Febraayo 2021: Kulanka kooxo-hoosaadka. • Maarso 2021 – Maajo 2021: Kooxo-hoosaadka ayaa soo saari doona talooyinka la soo jeediyay. • Xaggaaga – Deyrta (Fall) 2021: Kooxo-hoosaadka ayaa horay ugu sii gudbin doona talooyinka ay BRC soo jeedisay. • Deyrta 2021 – Jiilaalka (Winter) 2022: Guddiga BRC ayaa waxay dhammeystireysaa talooyinka la soo jeediyay oo warbixin ayaa la diyaarinayaa.
Wajiga III: Wadahadalka Guddiga	• Jiilaal 2022: Warbixinta ugu damabaysa oo Guddiga Tayada Tacliinta ayaa la soo hordhigi doonaa Golaha Maamulka Tacliinta si ay u teggeliyaan.

Warka aan idii caddeeyo: dadaalkani kuma saabsana uun kaliya beddelka heerarkayaga qiyamka qalinjabinta. Wuxuu ku saabsan ! yahay in la siiyo dhabbayaal kaladuwan – oo si siman dadaal badan uga baahan – oo loogu talagalay carruurta inay muujiyaan inay ! diyaar u yihiin inay qalinjabiyaan, ooy qaataan diblooma wax ku ool leh. Wuxuu ku saabsan yahay in la hubiyo inay ardaydu waxay ! baranayaan ay ku habboon yihiin iyaga oo isla markaana ay wax u tarayaan bulshada. Wuxuu ku saabsan yahay abuuritaanka beelo ! dugsiyeed iyo aasaaska xiriiryo, ay halkaas tacliimiyeyaasha, waalidiinta iyo ardaydu ay dhamaantood ka wada shaqeeyaan sidii loo ! horumarin lahaa baridda iyo barashada. ” !

*- Guddoomiye Rosa **

Wax Ogaal Ahow

Si ay fursad u siiso nidaam xog oo hufan oo macno leh, NYSED waxay abuurta bar internet cabbir ah Qiimaynta Qalinjabinta ku lug leh soo bandhigi doona arrimo la socodsiinta dhammaan inta lagu jiro habsocodka.. Barta internet, waxaad ku soo gudbin kartaa faallooyin dadwayne adiga oo mara iimaylka oo rukunsada inaad hesho arrimo kula socodsiinta iimayl.

- **Barta internetka:** nysed.gov/grad-measures
- **Public Comment email:** GradMeasures@nysed.gov
- **Hashtag:** #NYSGradMeasures dusha Twitter, Facebook iyo LinkedIn.



Office of the Board of Regents
89 Washington Avenue, Room 110
Albany, NY 12234
Tel. (518) 474-5889
Faakis (518) 486-2405
Iimaylka: RegentsOffice@nysed.gov

